



Ka fikir macmiishii oo dukaanka ka weyday waxay rabtay. Qofka dukaanka leh intaa waxay ku tahay mushkulad weyn. Draawalada shaqadooda waxay tahay dariiqyada qaranka iyo caalamiga inay alaabta ku gaadhsiiyaan macmiisha, siday nolosha xitaa tashuus yar soo gelin. Waxay yihiin geesiyiinta saadka.

### **Draawal / -lad**

#### Maclumaadka shaqadaa:

Hadii gaadiid aad leedahay wadid ama sharkad weyn ka mid tahay – si kasta waa shaqo qofka isaga ismaamula’yo oo si madax banaan u shaqayna’yo. Waxa lo diraa’yaa meelo dhow Hamburg agagaarked ah ama meelo fog oo xadadka laga gudba’yo. Xitaa wa in la sii ogaadaa ma yaro inta goor oo ilaa hal usbuuc ku dhan guriga laga maqnaana’yo.

Tobabarka shaqada 3 sano ah waxa lagu barana’yaa sida gaadiid loo wado iyo waxa la hela’yaa draawal liisanka nooca C iyo CE. Waxa si fiican loo barana’yaa in la fahmo iyo la tiixraaco marka dariiqa la mara’yo inuu gaadiidka cilaad la’aan ahaado iyo la habsado alaabta raran inay waxbana ku dhici doonin. Sidaa sababteed gaadiid wadista waxa u dheeraad iyo muhim ah in fahmaada farsamo la barto iyo sida ugu fiican gaadiidka loo rari lahaa. Waxaana muhiim ah dukumeentiga xamuulka in la akhrin karo, la garana’yo wixii lagu qori lahaa iyo in si fiican loo fahmo. Sidaas a’yaa sharkadaha alaabta wakhti habsaan lahayn loogu geyn karaan.

#### Shuruudaha:

Hadii la rabo in la codsado shaqo tobabareed oo lagu noqona’yo gaadiid draawal ama draawalad wa in ugu yaraan dugsiga dhexe ama dugsiga sare lagu qalin jebiyaa. Da’da lagu bilaabi karo waa 17 jir.

**Sharkadaha waxay raadina’yaan codsadeyaal oo farsamo fahaamad u ha’yaan iyo xiiso u leh gaadiidyada, ka helaan inay la macaamilaan dadka kale, qof qorsheynta ku fiican, qof wakhtiyo marmar ee maskaxda culeys iyo cadaadis saarantahay xamili karo iyo keligii hawsha maamuli karo.**

#### Mushahar:

Tababare’yaasha sanadaha la tobabara’yo waxay hela’yaan mushahar kolba loo dalaca’yo. Sanadka ugu horee’yo tobabara’yaasha waxay helaan qiyaas ahaan 550 €. Laakiin sharkadaha wey kala duwan yihiin, waxayna ku saabsan tahay heshiisyada jiro.

**Maclumaadka shaqadaa ma danaynaysaa? Waxa codsad loo diraa karaa 500 sharkadaha socdaalka oo ka jiraan Hamburg iyo agagaarkeeda! Maclumaad kale waxaad ka helaysaa [www.logistik-lernen.hamburg](http://www.logistik-lernen.hamburg).**